



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
WADAJIR DISTRICT COURT
MOGADISHU-SOMALIA

Summad: MDWAD/437/2021

TR. 05/08/2021

UJEEDO:- SUGID MILKIYAD DHUL AY KA DHISAN YIHIIN GURI & GARAASH, IYO CADEYN IIB DIGRISOONE IYO DAMIINU MAAL.

Maanta oo ay Taariikhdu tahay 05/08/2021, Waxaa Maxkamadda Hor Yimid Markhaatiyaasha kala ah:-

1-) C/wahaab Maxamed Cabdi Somali ah, Ku Dhashay Muqdisho, Sanadkii 1973, Ina Xaliimo Xuseen Xasan, oo sita National ID.NO.2730126158063.

2-) Maxamed Xasan Maalin, Somali ah, Ku Dhashay G/kacyo Sanadkii 1958, Ina Warsan Guure Iidle, oo sita Somali Pass.l.r.P00813665.

Waxey Maxkamadda Horteeda Ka Caddeeyeen in Dhul ay Ka Dhisan yihiin Guri iyo Garaash oo Ku Yaal Xamar Degmada KAARAAN "Heliwaa" Cabirkiisu Dhan yahay 3,100-MQ, uuna Milkiyadiisa uu leeyahay MARXUUM XASAN CILMI BARKHADLE, isla Markaana uu Dhulkaas uu ku qornaa Shirkadda Beeraha iyo Xoolaha "Banaadir" Sida Ku Cad Warqada Ref:-969/89 Tr,5/9/1989 Kana Soo Baxday Nootaayo Dr, Maxamed Macalin Yuusuf, Soodimihisuna ay Kala Yihiin Bari,Koofur iyo Galbeed Waxaa Ka mara Jidad Waqooyina Waxaa Ka Xiga Dhul dad, Shirkadaas oo Ka dhaxaysay Maxamed Cumar Maxamed & Xasan Cilmi Barkhadle, Isla markaana Qaybtii uu Lahaa Maxamed Cumar Maxamed uu Ka iibsaday Marxuum Xasan Cilmi Barkhadle Sida Ku Cad Warqada Digriisoonaha ee Ku Taariikhaysan 29/04/1992, dhulkiina Milkiyadiisa ay u Wareegtay Marxuumka, Waxayna ugu danbeyn Labada Markhaati Maxkamadda u Cadeeyeen in Marxuum Xasan Cilmi Barkhadle uu leeyahay Milkiyada Dhulka Sare Ku Xusan, isla markaana Milkiyadaas sife sharci ah, uga wareegin sida libin, Hibeyn, Rahmid I.W.M, ayna dhaxaltooyadiisa u Madax Banaan yihiin Ku Tusarufka Hantidaas.

CADDEYN DAMIINU MAAL.

Waxaa Maxkamadda Hor yimid CALI YUUSUF KAAHIYE ina Faadumo Diiriye Ku dhashay G/kacyo 1967 Sita Somali Pass.l.r.P00805107, Wuxuu Maxkamadda Ka Hor Caddeeyay in uu Damiinu Maal Buuxa ka yahay Milkiyada Dhul ay Ka Dhisan yihiin Guri iyo Garaash ee Sare Ku Xusan, Wixii Burin Sharci ah, ee Ku Yimaada, Sida Hadii ay Dhacdo in Qof Kale uu La Yimaado Dukuminti Sharci ah, oo Sheeganaya Milkiyad.

=SAXIIXA MARKHAATIYAASHA=

1-)C/wahaab Maxamed Cabdi

= SAXIIXA DAMIINU MAALKA
CALI YUUSUF KAAHIYE

2-)Maxamed Xasan Maalin

SUGITAANKA MAXKAMADDA=

Markay Dhageysatay Markay aragtay Markay aragtay Markii La Horkeenay Waxay Maxkamadda Dhulka ay Ka Dhisan yihiin Guri iyo Garaashka ee sare ku xusan, Asbaabahaas Kor Ku Xusan Aawadeed, Waxay Maxkamadda Sugeysaa in Marxuumka Xasan Cilmi Barkhadle, ay Dhaxaltooyadiisa Ku tasarufi karaan, sida iib iyo wixii la mid ah, Waana Sugitaan Mulkiyad Dhulka, iib Cadeyn Digriisoonaha iyo Damiinu Maal, Waafaqsana sharciga Islaamka iyo qaanuunka dalka u degsan, Maxkamadduna waxay ka saxiixdey dhinacyada uu khuseeyey waxayna ku qortey Diiwaanka Guud ee Maxkamadda

=KAALIYAHA MAXKAMADDA=

C/risaaq Cali Cabdi "Caabi"



CARSOORAHA MAXKAMADDA DEGMADA WADAJIR=

Dr. Axmed Maxamed Cali

JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال

SOMALI REPUBLIC


WARQADDA AQQONSIGA

بطاقة الهوية

IDENTITY CARD



L. Qaranka/رقم الهوية/National ID
27301216158063



Magaca/الاسم/Name

ABDIWAHAB
MOHAMED ABDI



Taariikhda dhalashada/الميلاد/Birth

21 Jan 1973 MOGADISHU

Taariikhda la bixiyay/الاصدار/Issue

23 Feb 2014 MOGADISHU

Taariikhda uu dhacayo/الانتهاء/Expires

22 Feb 2019

Lab*Dheddig/الجنس/Gender

MALE

